Falanqayn kooban oo ku saabsan Buugga (The Somali Penal code with Comments and annotations based on preliminary studies)

Tusmo

1- Hordhac
2- Mabaadi'da waawayn ee Saldhigga looga dhigay XCS
3- Gunaanad
4- Waa kuma Qoraaga Buugga?

A- Hordhaca falanqaynta

Haddii alle idmo Waxaan falanqayn kooban ku samay doonaa Buugga(***the Somali Penal code with Comments and annotations based on preliminary studies***) ee uu qoray Dr.Renato Angeloni laguna daabacay Milano 1967, kuna qoran afafka Taliyaaniga iyo Engiriiska.

Quraagu wuxuu gogoldhiga buugiisa ku sheegay in Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed xeer lam.5 ee 16 December 1962, dhaqangalkiisuna bilowday 3_{dii} Apriil 1964' uu ahaa natiijo ka dhalatay daraasad si taxadar leh loo sameeyay, sidoo kale wuxuu intaa raaciyay in diyaarintii Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ay bilowday Maxkamaddii Cadaaladda ee Goballada koofurta Soomaaliya sanadku markuu ahaa 1957, hase ahaatee aan howshaas la dhamaystirin, waxaa xusid mudan in qoraaga buuggu uu 1957 ahaa la taliye ka tirsan Maxkamaddii cadaaladda isla markaana ka mid ahaa xubnihii bilaabay qorista iyo diyaarinta Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed oo marjaca ugu waynaa uu ahaa Xeerka Ciqaabta

Taliyaaniga ee 1930, iyada oo xubnaha qoraayay ay isku dayayeen sida qoraaguba sheegay in lawaafajiyo Xeerka dhaqanka dadka Soomaaliyeed iyo duruufahooda.

Sidoo kale Qoraaga buuggu wuxuu gogoldhigga buugga ku sheegay in xurriyadii ka dib laga ambaqaaday halkii ay joogtay howsha qorista Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ka dib markii Barlamaankii ugu horreeyay ee Xurriyada kadib la dhisay uu soo saaray sharci Lr.5 ee 30 Janaayo 1962 oo xukuumadda loogu xilsaaray in ay samayso afar Xeer oo kala ah Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo Xeerka Nabadgalyada Wadooyinka, kadibna loo saaray guddi arrintaas ka shaqeeya.

Qoraagu wuxuu isla gogoldhiga buugiisa ku sheegay inay sharaf u tahay in uu ahaa Gudoomiyihii guddigii farsamada ee diyaariyay ama qoray xeerarka aan soo sheegnay oo uu ka mid ahaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Ugu dambayntii Buuggu waa buug aad u yar oo ka kooban 31 bog, haddii si kale loo dhahana wuxuu ka kooban yahay 61 bog oo bogna uu ku qoranyahay af taliyaani, bogga ku xigana tarjumaadiisii oo af engiriis ah ay ku qorantahay, hase ahaatee nuxurka buuggu aad buu u balaaranyahay, wuxuuna iftiiminayaa falsafadda guud ee uu ku dhisanyahay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

B-Mabaadi'da waawayn ee Saldhigga looga dhigay XCS

Qoraaga buuggu wuxuu sheegay in Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed oo dhan ay saldhig u yihiin 5 mabda' oo waawayn, mabaadi'daas oo horay loogu qarriray Dastuurkii 1960, mabaadi'daas oo ah kuwaan aan hoos ku sheegi doonno:

1. **Mabda' a Sharci ahaanshaha Dambiga iyo Ciqaabta**, oo loola jeedo in aan dambi laga dhigi Karin fal ama fal la,aan aan Xeerka ciqaabta Guud iyo xeerar ciqaabeedyada kale ee gaarka ah aysan dambi u aqoonsan , sidoo kalana aan qofna la saari Karin ciqaab uusan sharcigu saarin, qoraaga buuggu wuxuu leeyahay mabda'aan waxaa saldhig u ah mabda'a sarraynta sharciga ee ku xusan dastuurka gaar ahaa qoddobka 5_{aad} ee Dastuurkii 1960. Fiiri qoddobka 1^{aad}ee XCS
2. Mabda' labaad ee qoraagu sheegay in saldhig looga dhigay xeerka ciqaabta wuxuu yahay **Mabda'a dib u noqosho la'aanta Xeerka ciqaabta** oo si faaf-faahsan looga hadlay qoddobka 2^{aad} ee Xeerka ciqaabta , dastuurukuna uu ku qarriray qoddobkiisa 42aad.
3. **Mabda'a Dabeecadda Guud ee Dabbaqaadda Xeerka Ciqaabta**, sida qoraagu qabo Mabda'aan waxaa dhalay kan koobaad ee ku saabsan Sharci ahaanshaha Dambiga iyo Ciqaabta, oo wuxuu leeyahay dhaqangelinta mabda'aas waxay keenaysaa in Xeerka Ciqaabtu uu qabto ama lagu dabbaqo cid kasta , muwaadin iyo Ajnabi' dambi gudaha lagu galay iyo mid dalka dibadiisa lagu galay , walow dambiyada dalka dibadiisa

lagu galay ay u qaybsamaan kuwa in qofka dambi gaystaa lagu ciqaabo aysan wax shuruudo ah ku xirnayn oo ah kuwa ku xusan qoddobka 7aad ee XCS iyo kuwa kale oo in qofka dambi dalka dibadiisa ku galaa lagu maxkamadeeyo gudaha dalka ay shuruudo ku xiranyihiin oo ah kuwa ku xusan qoddobka 8aad ee XCS.

4. **Mabda'a Shaqsi ahaanshaha mas'uuliyadda ciqaabta,**

Qoraagu wuxuu sheegay in Mabda'aan uu ka mid yahay mabaadi'da ugu muhimsan ee asaaska looga dhigay dejintii Xeerka Ciqaabta, Mabda'aan waxaa horay loogu damaanad qaaday qoddobka 43aad ee Dastuurkii 1960.

Mabda'aan wuxuu si wanaagsan ugu muuqdaa sida qoraaguba sheegay meelo kala duwan oo Xeerka ka mid ah oo ay ku jiraan kuwaan:

- Si loo dhaqangeliyo mabda'aan xeerku wuxuu jiritaan dambiyada si guud ugu shardiyay helitaanka tiirarka maadiga ah ee dambiga (qoddobada 20 ilaa 22) iyo tiirar maskaxeed (qoddobada 23 ilaa 31aad)
- Sidoo kale meelaha mab'adaan ka muuqanaayo sida qoraaguba sheegay waxaa ka mid ah duruufaha ciqaabta meesha ka saara ee ku qoran qoddobada 32aad ilaa 38aad ee Xeerka , sababtoo ah markasta waxaa la eegayaa shaqsiga sida uu u dhaqmay iyo qasadkiisa, oo waxaa laga yaabaa laba qof oo hal ficil ku wada kacay in qofna ciqaab la saaro qofna loo tixgeliyo duruufaha dambiga meesha ka saara ee ku xusan qoddobada aan soo tilmaannay.
- Arrimaha kale ee arrintaan muujinaaya ee xeerka ku jira waxaa ka mid ah duruufaha dambiyada oo kala ah, duruufaha dambiga cusleeya(qoddobka 39aad) , duruufaha dambiyada fududeeya (qoddobka 40aad), duruufaha mowduuciga ah iyo kuwa qofeed (41 ilaa 46aad ee XCS) taas la micno

ah in qofkasta duruufihiisa si gaar ah loogu tixgelinaayo jiritaankooda iyo jiritaan la'aantoodaba.

- Meelaha kale ee Mabda'a Shaqsi ahaanshaha mas'uuliyadda ciqaabta ay ka muuqanayso waxaa ka mid ah sida qoraaguba sheegay qoddobada ka hadlaaya heerka qaadidda mas'uuliyadda ciqaabta fiiri qoddobada 47 ilaa 60
- Arrimaha kale ee mabda'aan la xiriira waxaa ka mid ah qoddobada ka hadlaaya dambi ku noqnoqde, caadeesyte iyo dambi xirfad ka dhigte, ee lagu jideeyay qoddobada 61aad ilaa 70aad ee XCS.

- Qoddobada 71aad ilaa 80aad ee ku saabsan dambi wada gelid ama dad badan oo dambi ka wada qayb qaatay ayaa iyagana muujinaaya mabda'a Shaqsi ahaanshaha mas'uuliyadda ciqaabta,.

5. Mabda'a dabeecadda bulshadeed ee ciqaabta

Sida qoraaguba sheegay mabaadi'da ugu waawayn oo uu ku dhisanyahay xeerka ciqaabta soomaaliyeed waxaa ka mid ah mabda'a dabeecadda bulshadeed ee ciqaabta, Mabda'aas oo horay loogu qarriray qodobka 44aad ee dastuurka, Sababtoo ah Ciqaab kasta waxaa la eegaa faa'iidada ay bulshada u leedahay. Meelaha uu ka muuqanaayo mabda'aas waxaa ka mid ah:

1. Qodobbada ka hadlaaya in la kala saaro goobaha lagu xiraayo ama ay ciqaabta ku dhamaysanaayaan dadka danbiyada xirfadda ka dhigta sida uu

tilmaamaayo qodobka 136aad iyo sidoo kale in maxaabiista caadigaa laga dhex saaro dadka u baahan daawayn gaar ah.

2. Si taa la mid ah maadaama dhaqan celinta caruurta iyo in ay bulshadooda si sahlan ugu so laabtaan ay aad u fududahay muhiimad gaar ahna ay leedahay ayaa qodobka 137aad wuxuu qeexay sida ay lama huraan u tahay in caruurta goob gaar ah lagu Xanaaneeyo, goobahaas oo ka soocan kuwa lagu xiro dadka qaangaarka ah.
3. Si taa la mid ah xeerku waxa uu jiddaynayaa in maxaabiista si loo dhaqanceliyo loo diraayo shaqooyin ay qabtaan' ayagoo xaq u yeelanaayo inay helaan mushaar ama xuquuq sida uu tilmaamayo Qoddobka 139aad ee xeerka ciqaabta.
4. Sida uu qoraagu qabo ciqaabaha ku xusan xeerka waxaa saldhig u ah markasta bulshada oo marka qof la ciqaabaayo ujeeddadeedu waxay tahay in xubnaha kale ee bulshada aysan ku dayan ruuxaas danbiga galay oo ay ku waana qaataan, sidoo kale xabsiga waa in maxaabiista lagu dhaqan celiyaa si ay bulshada ugu soo laabtaan ayagoo Dhaqankoodu uu caadi kusoo noqday.

Qodoba kooban oo xeerka ciqaabta ah waxay jiddaynayaan ciqaab dil ah sida qodobbada la xariira danbiyada culus ee shaqsiyadda dawladda lid ku ah, Qodobadaas oo ay ka mid yihiin 184, 185, 196, 200, 221, 222, iyo 223. Iyo sidoo kale danbiyada waawayn ee lidka ku ah nolosha aadanaha sida kuwa ku xusan 329, 334, 335, 434, iyo kuwa kale.

Ujeeddadu waxay tahay in dadka dambiyada noocaasi ah galo aysan mudnayn inay bulshada ka sii midnoqdaan khatarta ay bulshada ku hayaan darteed .

Sida qoraagu sheegay qodobo badan oo xeerka ku jira waxaa looga gol llahaa in lagu difaaco danaha bulshada si guud iyo xuquuqda aadanaha si gaar ah, qodobada ay ka muuqato in si guud loogu difaaco danaha bulshada waxaa ka mid ah Dambiyada lidka ku ah haybadda qaranka ee ku xusan qodobada 184 ilaa 239 XCS, sidoo kale dambiyada la xiriira Amniga iyo badqabka bulshada ee ku qoran qodobada 329 ilaa 347 ee XCS, si taa la mid ah qodobada loogu talaalay in si guud loogu difaaco danaha bulshada waxaa ka mid ah dambiyada lidka ku ah damiirka bulshada iyo dhaqanka suuban ee ku xusan qodobada 398 ilaa 417 ee XCS.

Qodobada looga gol llahaa in lagu difaaco xuquuda aadanaha sida qoraaguba sheegay waxaa ka mid ah dambiyada lidka ku ah Caafimaadka iyo taranka aadanaha ee ku xusan 418 ilaa 424 ee xeerka ciqaabta soomaaliyeed iyo sidoo kale dambiyada lidka ku ah badqabka qofka ee ku xusan qodobada 434 ilaa 450 XCS

C- Gunnanad

Ugu dambayntii Qoraaga Buuggu wuxuu Nuxurka Xeerka Ciqaabta ku soo koobay in uu hoos imaanaayo 5 mabda’ ee waawayn oo horay loogu qarriray dastuurkii 1960, isaga oo intaa raaciyay in 565 qoddob ee uu ka kooban yahay XCS ay yihiin faaf-faahin, sii micnayn iyo sharaxaad laga bixiyay shantaas mabda’ ee aan soo xusnay.

D- Waa kuma Qoraaga Buuggu?

Magaca qoraaga Buuggu waa Dr.Renato Angeloni , wuxuu u dhashay dalka taliyaaniga wuxuuna ahaa intuusan Soomaaliya imaan Garsoore Maxkamadda Racfaanka**.**

Macluumaadka aan ka helay Qoraaga Buugga waxay ku kooban yihiin kuwa la xiriira wuxuu qabtay intuu Soomaaliya joogay iyo buugaagtii uu ka qoray shuruucda Soomaaliya.

Macluumaadkaas waxaa ka mid ah kuwaan hoos ku Xusan:

1- Lataliyaha Maxkamadda Cadaaladda, oo ahayd Maxkamaddii ugu sarraysay Goballada koonfureed ee wisaayada qaramada midoobe ku jiray lana dhisay 1956.
2- Xubin ka mid ah Guddigii farsamo ee diyaariyay Dastuurkii 1960.
3- Guddoomiyaha Guddi loo xirsaaray qorista 4 sharci oo kala ahaa: XCS, XHCS, XNG, iyo Xeerka Nabadgalyada wadooyinka,
4- Xubin ka mid ah Guddigii midaynta shuruucda (Consultative Commission for legal Integration) oo

madaxwayne Aadan Cabdule ku magacaabay Wareegto Lr 19 ee 11/October 1960.

Buugaagta kale ee uu qoray ee ku Saabsan shuruucda Soomaaliya waxaa ka mid ah:

A- Diritto Constituzionale Somalo

Laga Daabacay Milano 1964

B-Principio di diritto Amministrativo Somalo, oo isna laga Daabacay Milano 1965

Qareen: Daahir Maxamed Cali